

Screening mammography for women with a family history of breast cancer

## Baarista Maamagarafiga ee Haweenka oo leh taariikh qoyseedka Kansarka Naaska



Baarista Naaska ee WA waa adeegga baarista maamagarafiga oo lacag la'aan ah oo la siiyo haweenka. Waa hubin caafimaadka oo muhiim u ah haweenka da'doodu tahay 50-69 sano hase ahaatee waxaa kaloo ka-qaybgeli kara haweenka da'doodu tahay 40 sannadood. Faafiskan yar wuxuu ka jawaabayaa su'aalaha qaarkood oo aad qabi karto oo ku saabsan baarista maamagaraafiga haddii aad leedahay qof qaraabo ah oo qaba kansarka naaska.

### Maxay tahay macnaheedu inaad leedahay taariikh qoyseedka kansarka naaska?

- Ugu yaraan hal xubin oo qoyskaaga ah ayaa qabtey kansarka naaska.
- Markii dhowr xubnood oo isku qoys ah lagu sheego isla cudur, waa wax caadi ah in loo qaato inay tahay wax layska dhaxlay.
- Kansarka naaska laf ahaanteedu lays kama dhaxlo, hase ahaatee jiinanka kansarka naaska ee khaldan ayaa layska dhaxli karaa.
- Badiba kansarka naaska wuxuu u dhacaa jaanis ahaan oo keliya mana keenaan waxyaalaha layska dhaxlo. Kansarka naaska ee qoyska ah waxaa lagu qiyaasaa 1-5% ee kansarada naasaha oo dhan.

### Xaqiiqooyinka dejinaya haweenka leh taariikh qoyseedka kansarka naaska

Haween badan, ogaanshaha inay leeyihiin taariikh qoyseedka kansarka naaska ayaa ah sabab keeni karta shaki. Si kastaba ha ahaatee, waa muhiim ah in maskaxda lagu hayo arintaas:

- 9dii haween oo Australia ah hal ayaa qabaysa kansarka naaska nolosheeda.
- Kansarka naaska waa cudur guud kaas oo badanaa la xiriira da'da korodha. qayb weyn oo haweenka ah tani waxay ugu dhacdaa si jaanis ah ee uguma dhacdo ayadoo ka dhalatay taariikh qoyseedkooda.
- Lahaanshaha hooyo ama walaasha oo qaba kansarka naaska macnaheedu maahan inaad si toos ah u qaadayso kansarka naaska.
- Qaadidda kansarka naaska macnaheedu maahan inaad dhabtii dhaxlayso jiinka khaldan, ama aad u gudbinayso carruurtaada.
- 9 ka mid ah 10kii haween ah oo qaada cudurka kansarka naaska ma lahan taariikh qoyseed kansarka naaska.

### Taariikh qoyseedkaaga ayaa ah wax muhiim ah:

- Markii wax ka badan hal qof oo qaraabo ah oo ka soo-jeeda isla hal dhinac oo qoyskaaga ah (dhinac aabaha ama hooyada) lagu sheego kansarka naaska.
- Markii qaraabadaas ay da'doodu ka yarayd 50 sannadood markii kowaad oo cudurka lagu soo sheegay.
- Markii qaraabadaas qabta kansarka naaska ay si dhow qaraabo u yihiin (walaasha halkuu ka ahaan lahaa ina adeer).
- Markii uu ku dhaco labada naasba kansarka naasku, kansarka naaska ee labka, ama kansarka naaska iyo kan ugxan-sidaha.

**For an appointment phone 13 20 50**

## **Sidee bay taariikh qoyseedku ii-saamaynaysaa inaan helo BaaristaNaaska ee WA?**

BaaristaNaaska ee WA waxay ku talinaysaa in la qaato baarista maamagaraamka labadii sano oo joogto ah gaar ahaan haweenka da'doodu tahay 50-69 sano, sida ay muujinayso cilmi-baaristu faai'dooyinka baarista maamagaraafiga waxay ku fiican tahay haweenka da'daas ah. Haweenka jira 40-49 iyo kuwa ka weyn 70ka sano waxaa kaloo lagu soo-dhaweynayaa inay ka soo-qaybgalaan maamagaraamka.

BaaristaNaaska ee WA waxay ururisaa macluumaadka taariikhda qoyska marka la qaadayo baarista. Tiro yar oo haween ah, dabecadda taariikh qoyseedkooda ayaa uga baahan karta inay si joogto ah uga qaybgalaan baarista maamagaraamka.

## **Haddii aan leeyahay taariikh qoyseedka kansarka naaska, da'dee ayaan ku bilaabayaa baarista, sideese badanaa isku baaraa?**

Haweenka da'doodu tahay 40 oo leh taariikh qoyseed weyn ee kansarka naaska waxay xaq u leeyihiin baarista maamagaraamka sannad kasta haddii ay yeeshaan mid ka mid ah waxyaalaha soo socda:

- Qaraabo heerka kowaad ah (hooyo, walaasha, gabadhaada, aabbe, wiilkaaga, walaal) kuwaas oo laga helay kansarka naaska ka hor da'da 50 sano.
- Qaraabada heerka kowaad oo kansar uga dhacay labada naasba (oo laga helay da' kasta uu yahay).
- Laba ama wax ka badan oo qaraabada heerka kowaad ah oo kansar naasku ku dhacay (oo laga helay da' kasta uu yahay).

Haweenka leh qaraabada heerka kowaad oo qabta kansarka naaska kana weyn da'da 50, kama khatar badna haweenka caadiga ah ee bulshada. Haweenkan waxaa lagu samayn doonaa baarista maamagaraamka labadii sanoba.

## **Maxaan kaloo samaynayaa?**

Haddii aad wax dareen ah ka qabto taariikh qoyseed-kaaga kansarka naaska, waa inaad kala hadashaa duruufahaaga shakhsiyeed dhakhtarka qoyskaaga. Haddii ay jiraan wax kiisas cusub ah oo kansarka naaska ah oo laga helay qoyskaaga waxaa muhiim ah inaad ogaysiiso BaaristaNaaska WA iyo GP-gaaga.

## **Xusuusnow, Ka Warqab Naasaha:**

- Eeg oo la soco wixii isbaddalo ah oo ku dhaca naasahaaga kuwaas oo aan caadi kuu ahayn.
- Si degdeg ah u arag GP-gaaga haddii aad dareento wax isbaddalo ah oo ku dhaca naasahaaga.
- Weydiiso GP-gaaga inuu baaro naasahaaga sannad kasta.

## **Wax su'aalo ah?**

Shaqaalaha BaaristaNaaska WA waxay ku faraxsan yihiin inay ka jawaabaan wax kasta oo su'aalahaaga ah. Fadlan ka wac (08) 9323 6700 ama haweenka miyiga deggan waxay wici karaan taleefanka lacag la'aanta ah ee 1800 800 033. Lambarka TTY waa 1800 241 708.

## **Ballan ayaa la samaysan karaa ayadoo la wacayo 13 20 50 (oo ah qiimaha wicitaanka degaanka)**

Haddii aad u baahan tahay turjumaan lacag la'aan ah, fadlan waxaad marka hore ka wacdaa Translating and Interpreting Service (TIS) taleefanka 13 14 50 waxaadna weydiisataa in lagu guulo adeegga ballamaha taleefanka 13 20 50.



Department of  
Health



A joint Australian, State and Territory Government Program

[www.breastscreen.health.wa.gov.au](http://www.breastscreen.health.wa.gov.au)

© BreastScreen WA, Department of Health

Telephone (08) 9323 6700 Facsimile (08) 9323 6799 TTY 1800 241 708 Bookings 13 20 50